



ismaamulka san diego

Warteena Biyaha ee Tijuana



Waraha biyuhu waa dhul soo jiita biyaha oo mara kanaallada, hawooyinka iyo wabiyada kadibna biyaha iskugu geeya meel godan – badanaa badda.




Waxaan ku tiirsan nahay warteena biyaha in ka badan inta aad isleedahay.

Mar kasta oo aan ku lugayno Beerta nasiinada ee Wabiga Tijuana Valley, aan kaam ka samaysano aana ka kaluumaysano Harada Morena, Ka cab biyaha kaliya, waxaan isticmaalaynaa ilaheena biyaha warta.

Warta biyaha ee Tijuana waa 1 kamid ah 11 warood ee biyaha ee ku dhex yaala Ismamaulka San Diego. Warta Biyaha ee Tijuana waxay ka bilaabayaa buuraha u dhow buurta Laguna. Biyaha ayaa intaas kadib gala Mexico kahor intaysan kusoo laaban Ismamaulka San Diego, markaas oo ay ku darsamaan Badwaynta Baasifiga ee bariga Xeebta Imperial. Haddii aad ku nooshahay aaga wartaan biyaha, talaabooyinka aad ku sameenayo gurigaaga iyo deegaankaaga ayaa naga caawin kara kor u qaadista tayada biyaha ku jira wabiyadeena, harooyinka, iyo badwaynta.

Qariirada Warta Biyaha ee Tijuana



Waxaan ka ilaalin karta wara'eenada biyaha dhowr talaabood oo kaliya!

Biyaha soo raaca warteena biyaha ayaa soo qaada wasaqda sida qaruuraxa, bakteeriyada, iyo qashinka, kaasoo sumayn kara marinadeena biyaha. **Muhiimada koowaad ee Warta Biyaha ee Tijuana waa in laga hortago wasaqda qaruuraxa, sida qashinka iyo ciida.** Marka aan nahay dadka deegaanka, waa hawl noo taala inaan nadiifino. Talaabada qof kasta ayaa isbadel wayn keenaysa.

Waxaad gacan ka gaysan kartaa ilaalinta warteena biyaha adoo qaadaaya talaabooyinka fudud si looga hortago wasaqda:



Qaruuraxa | iyo ciida wasaqda ah

- Xaaq luuqyadaada la maro ama qashinka ka aruuri halkii aad tuubada biyaha isticmaali lahayd. Ku rid qashinka qasaca loo sameeyay.
- U adeegso dhoobo iyo jaay aagaga la falay si aad uga hortagto nabaad guurka ciida aadna u badbaadiso biyaha.



Bakteeriyada | ku jirta wasaqda iyo bulaacada

- Ka ilaali fagaagaaga qashinka xayawaanka rabaayada ah. Qaado bac marka aad wado xayawaanka rabaayada ah oo si sax ah qashinkooda ugu rid qasacyada loo asteeyay.
- Daryeel sii nidaamka bulaacada ama daawaynta bulaacada. U soo sheeg dilaacyada ama daadashada bulaacada lambarka 858-505-6657.
- Si sax ah qashinka ugudar bulaacada RV adoo dhigaaya barta qashinka loo asteeyay.



Qashinka | ayna ku jirto qashinka geedaha

- Ku rid dhammaan qashinka qasacyada loo sameeyay oo daboolka u adkee.
- Booqo <https://wastefreesd.org/> si aad u hesho sida qashinka loogu daro ama dib loogu warshadeeyo agabka gaarka ah.

Ismaamulka San Diego iyo Iskaashatada ayaa sidoo kale ka wada shaqaynaaya ilaalinta caafimaadka wara'eenada biyaha.

Haddii aad doonayso inaad xog badan ka ogaato Warta Biyaha ee Tijuana , booqo www.projectcleanwater.org/tijuana-wma/

Nasoo Wac si aad u Hesho Xog dheeraad ah ama aad U soo Sheegto Wasaqda Biyaha.

watersheds@sdcounty.ca.gov ■ www.sandiegocounty.gov/stormwater

1-888-846-0800